ADEEGA LACAGTA EE MOBILADA: SIDUU U SHAQEEYO, HABKA LOO MAAMULO IYO SAAMAYNTIISA DHAQAALE.

HORDHAC

Adeega Lacagta ee Mobilada (Mobile Money Services/E-money) waa adeeg ay bixiyaan shirkadaha khadka mobilada (Mobile Network Operators-MNOs). Waa adeeg u sahla dadka aan fursad u helin in ay ka qayb qaataan adeegyada baananku bixiyaan (Formal Banking Sector) in ay si sahlan u isticmaalaan oo lacag loogu diro, ku kaydsadaan waxna ku iibsadaan. Lacagta Mobilka (Mobile Money) inkastoo qeexid sugan aanay lahayn, haddana qeexidaha kala duwan ee loo yaqaan waxa ugu caansan uguna wayn in ay tahay hab leh awoodii lacagta (Money Value) kaas oo dadku aqbaleen in ay wax ku kala badashaan, una qabato shaqooyinkii lacagtu u qaban jirtay. Waa hab u sahlaya qofkii isticmaala in lacagtiisii u kaydsanayd uu si dhakhso ah u isticmaali karo.

Adeega Mobilada ee Lacagta, waa adeeg lagu amaano in uu isku xidhnaanta bulshooyinka wadamada soo koraya (Developing Countries) si wayn uga qaybqaato dhinaca xidhiidhka ganacsi iyo dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee dhexdooda u dhaxeeya. Inta badan dunida seddexaad dhibta u wayni waxay ka haysataa in dadka miyiga iyo dhulka magaalooyinka ka fog degani helaan adeegyada ay qabtaan baananku oo ah kuwo kaliya ku kooban ama u badan dhulka magaaloyinka ah. Taas weeye ta ay dabooleen shirkadaha bixiya khadka moobilada. Adeega ay shirkadahani macaamiishooda u sahlaan waa ka loo yaqaan Lacag Dhigid, Lacag La bixid {Cash-in Cash-out (CICO)}. Qof ka jooga dhulka fog ee raba in uu xoolihiisa adeeg uga iibiyo halka uu joogo, wuxuu si fudud ula soo xidhiidhaa qof ehelkiisa ah oo jooga magaalada, lacagtiina halkaas baa loogu diraa. Halkii Baanka xarun uun uu qofku u doonan lahaa lacagta, adeegyadani qofka wakhtiga waa u madhxiyaan oo qofku mobilkiisa ayuu kaliya la sheekaystaa. Ilaa 2000 sanadka miilaadiga wixii ka danbeeyay uunbay ahayd adeegani markii uu hirgalay, aduunyadana aad baa looga soo dhaweeyay, faaidadiisana aad baa loo mahadiyay, waxaana gadaal laga galay falanqaynta Habka maamul iyo sharciyadeed ee adeegyadan lagu hagi lahaa si loo xakameeyo saamayn kasta oo waxyeeli karta dhaqaalaha guud ee wadanka.

HABKA UU U SHAQEEYO IYO HABKA SHARCI AHAAN LOO MAAMULABA.

Sidaynu hore ugu soo sheegnay qaybaha hore ee qoraalkeenan, adeegan lacagta ee mobilada waxaa bixiya shirkadaha telefoonada, kuma koobna iyaga oo kaliya balse waxa sidoo kale bixiya baananka iyagoo kaashanaya shirkadaha mobilada. Haddaba ka ay isticmaalaan baananku waa mid ka duwan kan ay isticmaalaan shirkadaha telefoonadu, hadday noqoto xag sharci iyo hab ka ay u shaqeeyaanba. Ka aynu ka hadlayno ee qoraalkan intiisa badan ku eegaynaa waa ka ay isticmaalaan shirkadaha moobiladu.

Adeegani waxa uu u shaqeeyaa qaab ah in shirkadaha moobiladu furaan xarumo ay ku hirgalinayaan adeegyadan, xarumahaasi waa xurumaha qabta shaqadii aynu soo sheegnay ee ahayd Lacag Dhigid Lacag Labixid {Cash-in Cash-out (CICO)}. Lacagta ay bulshada isticmaasha adeegu dhigato xarumaha shirkada ayaa iyada oo xarfo electronic ah (electronic digit) qofka loogu diraa mobile kiisa. Halkaas wixii ka danbeeya waxa ka bilaabma saamaynta adeega, qofkii lacagta dhigtay wuxuu awoodaa in uu dib usii iibiyo lacagtii digitka ahayd ee loogu shubay oo meherad ka qaato lacag kaasha iyagana dib uga iibiyo digitkii. Tusaale ahaan, $10 dollar ayaa qof dhigtay shirkada, qofkiina waxa mobilka loogu shubay $10 ee uu dhigtay. Qofkaasi wuxuu awood u leeyahay in uu lacagtiisaa ka iibiyo meelo kala duwan oo uu wax ku qaato tusaale ahaan $5 dollar Buug ku iibsado, $5 dollar oo kalana saacad ku iibsado. Markaas laga

bilaabo $10 dollar ee shirkadu haysay waxa kala leh labadaa meelood ee qofku ka iibsaday midna buugta midna Saacada. Iyaguna waxay awood u leeyihiin in ay shirkada kala soo baxaan lacagtooda, in ay wax ku sii iibsadaan iyo in ay qof kale u diraan oo lacag ahaan ku qaataan. Weli $10 dollar ee shirkada yaalay kolba qof uun baa qaadanaya oo lahaanshihiisa la wareegaya. Habkaas ayay guud ahaan lacagtu u wareegtaa, ilaa inta uu qof shirkada tagayo oo lacagtii la baxayo, shirkaduhuna waxay khidmad yar saaraan lacagahaas la isku dirayo ee digitka ah halkaas baanay ka faaidaan, inkastoo Shirkadaha Somaliland si sidaas ka duwan uga faaidaan.

Sharci ahaan waxa jira qaabab kala duwan oo dawladaha aduunku u maamulaan adeegyadan lacagaha ee shirkadaha moobiladu bixiyaan. Marka ugu horeysa ee ruqsada shaqo la siinayo waxa lagu xidhaa shirkada doonaysa in adeeg noocan ah bixiso shuruudo adag oo ay tahay in shirkadu sideeda uga soo baxdo. Shuruudahaas waxay ku qotomaan oo laga eegaa dhinacyo muhiima oo ay ka mid yihiin:

I. **Kala xadaynta Adeegyada (kala xadayn Sharci)**: Shirkada waxa loo ogolaadaa noocyada adeeg ee sharcigu ogol yahay uun in ay bixiso. Waxa shirkadaha moobilada laga ilaaliyaa in ayna noqon kuwa bixiya shaqada xidhiidhinta (Intermediation) taas oo ay qabtaan baananku. Shaqadaas oo ah in ayna amaaho bixin Karin, in ayna waxba ku maal gelin Karin lacagaha ay dadka u hayaan iwm.

II. **Dhawrida Hantida Macaamiisha**: Si loo hubiyo in ay amaan tahay hantida macaamiisha ee shirkadu doonayso in ay ku shaqayso, waxaa shirkada lagu xidhaa shuruudo door ah oo ay ka mid yihiin.

   a) In shirkada adeega bixinaysaa ay lacagta ay digit ahaan mobilada dadka ugu shaqaynayso mid la mid ah oo u dhiganta ku hayso kuna maamusho ugu yaraan laba account oo mid kamid ah yahay baanka dawlada ee Central bank. Qodobkani wuxuu faaido leeyahay, haddiiba ay shirkadu kacdo waxaa si fudud u badbaadaysa hantidii umada oo dawlada ayaa si fudud ula soconaysa account-nadan. Account-nadan lacagta ku jirta marna ma sheegan karaan cida shirkada leh, wax dhaqdhaqaaq ah oo ka baxsan kaas shaqada ahna lagama ogola.

   b) In shirkada adeega bixinaysaa ay haysato hanti gaadhaysa inta sharcigu qeexayo. Wadamadu way ku kala duwan yihiin hantida ugu yar ee laga rabo shirkada doonaysa in adeeg noocan ah isku diiwaan geliso (Tusaale ahaan Afghanistan $200,000. Philippines $1,000,000). Ujeedada qodobkan laga leeyahay ayaa ay ugu wayn tahay in la hubiyo in shirkadu awood ahaan, qalab ahaan iyo farsamo ahaanba u diyaar santahay hawshan oo ay dabooli karto qarashaadka maamul iyo farsamaba. Sidoo kale ujeedka labaad ee ugu way nee isna laga leeyahay ayaa ah si looga hor tago oo caqabad looga dhigo shirkadaha kale ee doonaya in ay suuqa soo galaan oo adeegan bixiyaan. Kaliya shirkadii awoodeeda maaliyadeed u saamaxayso uun baa la rabaa in ay hawshan ruqsad u hesho.

Inta badan wadamadu waa ku kala duwan yihiin habka siyaasad ahaan ay u maamulaan. Intooda badan qaab dhismeedka sharci (Regulatory framework) ee ay isticmaalaan waa ka lagu maamulo Lacagta noocyadeeda kala duwan ee loo yaqaan (Monitory Policy). Iyagoo ka duulaya siyaasadaa guud ee lacagta ay ku maamulaan ayay sameeyaan sharci hoosaadyo loogu talo galay in lagu maamulo adeega lacagaha moobilada ee shirkadaha isgaadhsiintu bixiyaan. Sharci hoosaadyadaasi waxyaabaha ay taabtaan waxa kamida ee laga xusi karaa: Xaddiga Lacagta qofku maalintii, bishii iyo sanadkiiba diri karo, sugnaanshaha iyo ilaalilanta xogta macmiilka iyo waxyaabo kale oo muhiima u ah habsami u socodka adeega.

SAAMAYNTA DHAQAALE EE ADEEGA LACAGAHA EE MOBILADU LEEYIHIIN.

Adeega lacagaha ee Mobiladu wuxuu leeyahay saamayn dhaqaale oo tabban iyo mid toggan ba. Adeegani wuxuu soo kordhiyaa dhaqdhaqaaqyo dhaqaale (Economic transactions) oo waxa uu ka qayb qaataa in iskuxidhnaanta iyo dhaqdhaqaaqa ganacsi kordho. Haddaba si loo qiyaaso saamaynta dhaqaale ee adeegani ku soo kordhiyay dhaqdhaqaaqa ganacsi iyo isku xidhnaanta maaliyadeed, waxa laga duulaa oo dhaqaale yahanku ka shidaal qaadantaan aragtida lacagta (Theory of Money).

Lacagtu (Money) waa hanti kasta oo kayd ahaan aad u haysato oo aad wax ku bedelan karto oo transaction aad si fudud ugu samaysan karto. Lacagtu waxay noqon kartaa alaab (commodity), waraaq (paper) amaba tan wakhtigan aynu noolnahay loo yaqaan E-money, oo ah lacag electronic ah ama card ha la isticmaalo ama mobile. Adeega Lacagaha ee Mobiladu (Mobile Money) wuxuu ka mid yahay nooca lacagta ee hadda loo yaqaan E-Money.

Haddaba lacagtu saamayn noocee ah ayay dhaqaalaha ku leedahay, maadaama oo Adeega Lacagta ee Mobiladu isla fahanay in uu aragtida lacagta soo galayo. Lacagtu saamaynta u wayn ee dhaqaalaha ku yeelataa waa saamaynta Sicir Bararka (Inflation). Sicir Bararku waa isbedelka celcelis ahaan ku kordha qiimayaasha wakhti go'an. Qiimayaashuna (Prices) waa xadiga lacag ah ee lagu bedesho ama gato alaab ama adeeg (goods or services). Haddaba lacagtu maadaama oo aynu nidhi saamaynta dhaqaale ee u wayn ee ay leedahay waxa weeye waxay saamayn ku leedahay sicir bararka su'aashu waxa weeye sidee ayay ugu leedahay loona ilaaliyaa?.

Awood sharci ayaa siinaysa bangiga dhexe ee dawlada (Central Bank) in uu yahay ka kaliya ee lacagta soo daabici kara, isla markaana maamuli kara, oo hadba la socon kara xadiga lacag ah ee suuqa ku jirta noocay doontaba ha ahaatee ama waraaqo ama noocyo kale (*Halkani Dhaqaalayahanku lacagta wuxuu u kala saaraa qaybo Currency, M1, M2 and M3 si uu lacagaha ula socdo*). Markasta oo lacag badan ay suuqa soo gasho waxa isbedel ku yimaadaa qiimayaasha alaabta. Sidoo kale markasta oo lacagta suuqa ku jirta ay yaraato iyadana waxa isbedela qiimayaasha alaabta. Haddaba lacag kasta oo suuqa lasoo galiyo waxa loogu talo galay in ay wareegto suuqa dhexdiisa xadi go'an. Tusaale ahaan $10 dollar ee aynu xagii sare kaga soo sheekaynay. Tani waxay hirgali kartaa oo kaliya marka baanka dhexe si fiican ula socdo lacagta gacanta dadweynaha ku jirta markaas ayuu xisaab ku fadhiisin karaa xadiga ay lacagtaasi mid kasta oo kamid ahi wareegi karto suuqa dhexdiisa. Markasta oo xadiga lacagtu (quantity of money) bato waxa yaraanaya xadiga lacagtu wareegayso (velocity of money) suuqa dhexdiisa; tani waxay ka dhigan tahay lacagtaasi qiimo badan dadka dhexdiisa kama yeelanayso. Sidaas si ka duwan, haddii xadiga lacagtu (quantity of money) yaraado waxa badanaya xaddiga lacagtu wareegayso (velocity of money); tani waxay ka dhigan tahay lacagtaasi markaasi qiimo ayay leedahay. Si labadaa xaaladood loo miisaamo, oo loola socdo hadba saamaynta dhaqaale ee lacagtu leedahay, baanka dhexe wuxuu suuqa geliyaa lacag marka dalabka lacagtu bato ee suuqa ay ku yaraato, si lamida marka suuqa ay ku badato lacagtu wuu ka saaraa isagoo isticmaalaya habab kala duwan. MARKASTA OO BAANKA DHEXE SOO DAABACO LACAG SI DAWLADU UGU BIXISO KHARASHAADKEEDA OO SUUQANA AY LACAG U GELISO, WAA DHIIG BAX DHINACA DHAQAALAHA AH, WAXAANA TUSEELE AYNU USOO QAADAN KARNAA LACAGTII FARAHA BADNAYD EE WASAARADA MAALIYADA WAKHTIGII WASIIR SAMAALE LASOO DAABACAY OO ILAA MAANTA SAAMAYNTEEDI AYNU XAL U RAADINAYNO.

Haddaba maadaama oo aynu wax ka fahanay saamaynta dhaqaale ee leedahay lacagtu. Si lamid ah Adeegyada Mobilada ee lacagtu waxay leeyihiin saamayntaa dhaqaale ee lacagtu leedahay maadaama oo ay aragtidii lacagta soo galayaan. Xadiga lacagta ah (quantity of money) ee digit ahaan ugu jira

moobilada waa in uuna ka badan ama ka yaraan xadiga lacagta ah ee shirkada adeega bixinaysa u yaala account nada sida gaarka ah isha loogu hayo ee ay ku leeyihiin baanka dhexe iyo bangiyada kaleba. Haddii uu bato xadiga digit kasta oo lacag ah oo Mobil ka ku jiraa uu wareegayo waxay saamayn ku yeelanaysaa dhaqaalaha iyadoo ka qayb qaadanaysa sicir bararkii. **Si taas lamid ah haddii lacagta mobilada lagu isticmaalo lacag qalaad (Foreign money) waxa hoos u dhaca qiimihii uu lahaa lacagta guduhu (Value of local currency). Wadamadu waxay aad uga hortagaan intooda badan in lagu isticmaalo adeegyada lacagta ee moobilada lacag aan ahayn ta wadanka. Wadamada laga isticmaalo lacago kala duwan waxay saaraan xanibaado (restrictions) si loo yareeyo isticmaalka lacagtaas shisheeye. Adeega maalin laha ahna (daily transactions) waxay ku isticmaalaan lacagaha wadanka.**

Saamayn dhaqaale oo aan la mahadinin ayuu Adeega Lacagaha ee Mobiladu ku yeeshaa wadamada soo koraya haddii aanay dawladu si dhaw ula socon. Wadamo badan adeegan waxay uga guureen habka casriga ah ee baananka iyagoo weli isticmaalaya mobiladii. Tusaale ahaan Adeega KAAFI ee shirkada Telesom oo kale ee ku xidhan DaraSalaam Bank. Qof kasta wuxuu account ka samaysanayaa Bank kadibna wuxuunbuu mobile ka wax u diri karaa cidii adeegaas leh ee account leh, waxaanu qofku isticmaali karaa oo kaliya wixii accountkiisa uu ku shubto ama loogu soo shubo. Adeegan casriga ah wuxuu u sahlaa dadka reer miyiga ah in ay bartaan sida baananka wax loogu kaydsado.

GUNNAANAD

Gabo gabadii maadaama oo adeegan lacagaha ee mobilada Somaliland aad looga isticmaalo faaidada uu guud ahaan bulshada u leeyahayna lagu amaanay shirkadaha bixiya, oo dhawr jeer warbixino caalami ah magaca Somaliland lagu xusay in adeegan si fiican uga shaqeeyo, waxaynu u baahanaynaa in aynu si fudud ula socono habka uu u hawl galo adeegani farsamo ahaan iyo sharci ahaanba. Adeegan oo faaidadiisa kala simanahay dunida dadkoodu kala daadsan yihiin ee sida wayn ugu baahan, waxa iyana marag ma doona in aynu aad uga xumaan doono saamaynta dhaqaalo xumo ee uu inagu keeni karo. Dheefta adeegani waa mid imikaba meesha kasii baxaysa, tusaalena waxa inoogu filan in uu qayb wayn ka qaatay hoos u dhaca qiimaha shilinka, waayo inta ugu badan adeegan waxaynu ku isticmaalnaa lacago qalaad. Intaas waxa dheer lacagaha qalaad ee macaamiishu dhigtaan ma jirto meel ay ku cadahay in account-no lagu hayo in kale, waxaana aad looga shaki qabaa in lacagtaas dib loo sii isticmaalo ama account-no wadanka dibadiisaa lagu kaydiyo. Haddaba, si intay goori goor tahay u xakamayno dhibaatooyinka dhaqaale ee ay keeni karaan waa in dawladu sharciyad adag samayso. Ugu horeyn waa in la helo sharciyadii lacagta lagu maamuli lahaa (Monitory Policy) oo baanka dhexe awood la siiyo, sidoo kale dib u qaabayn lagu sameeyo oo dadkii u ehelka ahaa laga hawl galiyo. Kumeel gaadh ahaan baanka dhexe waa in uu magacaabo Guddida Dabagalka iyo Korjooga (Monitoring and Oversight Committee). Guddidaas oo shaqadooda u wayn tahay in markastaba hubiyaan habsami u socodka dhaqdhaqaaqyadan maaliyadeed, haddiiba ay jirtana waa in guddidaasi noqoto mid hawl gasha.

Alla Mahad Leh

Abdifatah Sultan Adem
M.Sc, Development Economics
Hargeisa, Somaliland
E-mail: khaliil05@gmail.com
Khaliilsultan.wordpress.com

PPD: 29TH JAN 2017